

LIGHT READING

customer newsletter

Maarso/Abriil 2008



Abriil 22 waa Maalinta Dhulka

Sida soo socota ayaa ah qaab loo xafladeeyo Maalinta Dhulka: Wuxaan ka mid noqotaa macaamiisha 7,000 gaaraya ee City Light ee xushay tamarta aan hawada wasakhaynin. Sidee? Iyadoo loo maraayo barnaamijka **Green up**: Iyadoo la bixinaayo dhown doolar oo dheeraad ah bil walba waxaad iibsan kartaa tamarta dib loo cusboonaysiyo sida tamarta ka dhalata dabeysha iyo qorraxda, oo la mid ah 25, 50, 100 boqolkiiha ama in ka badan baahidaada tamarta. Wuxaan iska diiwaan gelisaa cinwaanka internetka ee <http://www.greenupseattle.org>. Haddii aad doonayso macluumaad dheeraad ah waxaad eegtaa bogga internetka ama waxaad wacdaa (206) 684-8822. Adeegyada turjubaanka ayaa la helayaa saacadaha ganacsiga, 7:30 subaxnimo illaa 6 fiidnimo, Isniinta illaa Jimcaha.

Deeq gaar ah ee lagu dhiirigelinaayo macaamisha guryaha: Wuxaan haatan ku soo biirtaa **barnaamijka Green Up (Green Up program)** iyadoo aad *ka qayb qaadanaysid muddo hal sano ah kaddibna* waxaan deeq kuugu soo diraynaa buskutka Shukulaatada dabiiciga ah ka sameysan iyo qiimaha hal tigidh oo ay laba qof ku soo booqan karaan shirkadda Shukulaatada ee THEO. Macaamiisha haatan ka tirsan **Green Up** waxay kordhin karaan ka qayb qaadashadooda kuwaasoo iyagana heli doona deeqdaan. Waxay arrintaan billaabmaycaa Maarso 2008 waxayna soconaysaa inta ay alaabta taal.

THEO Chocolate (<http://www.theochocolate.com>) waa shirkad ku taal Seattle ee ku taqasusta soo saaridda shukulaatada dabiiciga ah. Waxaa booqashada ka mid ahaan doona shukulaatooyin bilaash ah oo la tijaabiyo, macluumaadka ku saabsan halka laga keeno miraha kakawga (cacao) iyo waxyabo dheeraad ah.

Tilmaamaha ku saabsan isbeddelka fudud ee aad ku biirin karto noloshiina iyo si loo badbaadiyo cimiladeena iyo jiilka mustaqbalka, waxaad eegtaa <http://www.seattlecan.org>.



Miyya la gaaray xilligi la tuuri lahaa qaboojiyahaaga si dib loo warshadeeyo?

Wax faa'ido ah ay leedahay ma jirto in qalabkaaga gaboobay lagu haayo garaashka ama guriga hoostiisa marka aad tixgeliso in ay isticmaalaan *afar goor* in ka badan tamarta ay isticmaalaan noocyada qalabka cusub. City Light waxay qabaan barnaamijka tuurista dibu warshadeynta ee ku caawinaaya: Waxaannu bilaash kaaga qaadaynaa qaboojiyeyaasha iyo baraf dhaliyeyaasha gaboobay iyadoo aan kuu soo celinayno \$30. Haddii aad sidaan sameyso waxaad baajin doontaa illaa \$150 sanadkii oo ah kharashyada korontada adigoo ka qayb qaadanaya la dagaallanka kulka cimilada dhulka.

Waxaa deeqdaan loogu talagalay macaamiisha City Light waxayna quseeyaan gaar ahaan qaboojiyeyaasha iyo baraf dhaliyeyaasha shaqeeyaa, oo cabbirkoodu u dhaxeeyo 10 illaa 27 cagood oo seddex jibbaaran. Wuxaan ka eegtaa macluumaad tifaftiran oo dheeraad <http://www.seattle.gov/light/conserve/resident>. Si aad u hesho macluumaad ama aad u sameysato ballan lagaaga qaado, waxaad wacdaa **1-877-577-0510**.

Ololaha Nadaafadda Gu'ga wuxuu billaabmayaa Abriil 5-teeda.

Ololaha Nadaafadda Gu'ga ee Seattle wuxuu isku keenaa dad si ay uga wada shaqeeyaa mashruucyada lagu qurxiyo goobaha dadweynaha tusaale ahaan, dhirta la jaro, qashinka qaadista iyo sawirada darbiyada oo laga tirtiro. Ka qayb qaateyaasha waxay ka heli karaan khayraad bilaash ah hay'adda Seattle Public Utilities sida adeegyada qashin qaadista, gacmo gashiga, meeso jaakadka badbaadada iyo waxyabo dheeraad ah. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah waxaad wacdaa (206) 233-7187 ama booqataa <http://www.seattle.gov/util> waxaadna raadisaa "Nadaafadda Gu'ga."